



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
GUDDIGA MADAXA BANAAN EE DIB U HESHIISIINTA QARANKA

WAR SAXAAFADEED

19-September-2020

Shir ay yeesheen Xubnaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u heshiisiinta Qaranka oo ka wada hadlay shirkii u dhexeeyey Madaxda dowlad goboleedyada iyo madaxda Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya uga socday Magaalada Muqdishu intii u dhexeysay 13-17 September, 2020

Shirkaas oo daba socda talooyinkii iyto Go'aanadii kasoo baxay shirkii Dhuusa mareeb Three ee looga wada hadlay xaaladda wadanka kajirta ee Aminiga siyaasadda iyo dhammaan arrimaha Bulshada, gaar ahaan doorashada waqtigeeda soo dhowyahay.

Hadaba guddiga oo ka amba qaadaya natiijada kasoo baxday shirkaas waxay soo saareen war saxaafadeed ay ku taageerayaan Go'aanada lagu heshiiyey ee kasoo baxay shirkaas.

- 1- Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u heshiisiinta Qaranka wuxuu soo dhaweynayaa heshiiskii iyo Go'aanadii ay wada gaareen Madaxda dowlad Goboleedyada iyo Madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya oo uu Shir Guddoominaayay Madaxweynaha Dowladda Federaalka ee Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo.
- 2- Guddiga wuxuu Boogaadinayaa Dulqaadka, iyo Tanaasulka uu Muujiyey Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo intii uu socday Shirka iyo sida uu u aqbalay Go'aanada ka soo baxay shirkaas.
- 3- Sidoo kale Guddiga wuxuu soo dhaweynayaa Ra iisal Wasaaraha Cusub Mudane Maxamed Xuseen Rooble wuxuuna guddiga u rajeynayaa inuu Ilaahay ku garab galo Mas'uuliyadda loo idmaday xiligan kala guurka ah inuu u guto xilkiisa si waafaqsan sharciga dalka uyaala.
- 4- Ugu dambeeyn Guddiga wuxuu baaq u dirayaa Baarlamaanka Soomaaliya inuu Meelmariyo Heshiiskan Markii uu soo gaaro iyagoo kagudanaya Waajibaadkooda dastuuriga ah.

Wabillaahi Towfiiq



National Independent Reconciliation Commission, Federal Government of Somalia

Address: Compound of Guriga Hooyooyinka, Hamar, Wayne

Tel: 0615537075/0615529310/0615567771

E-mail: admin@nirc.gov.so

Web: www.nirc.gov.so